Macluumaad

Quseeyo adiga oo Iswiidhan ku cusub



Språk: Somaliska
Förvaltning: Sociala Resursförvaltningen
Enhet: Invandrarservice

Malmö stad

DIIWAANGELINTA BULSHADA [FOLKBOKFÖRING]

Marka aad adiga rabtid inaa ku noolatid Iswiidhan waa inaa iska *diiwangalisaa* meesha diiwaangelinta bulshada. Markaas baa adiga heleysaa lambarka aqoonsiga. Waxaa tagtaa *Hey'adda Canshuuraha* [*Skatteverket]* iyo waxaa hore u sii qaadataa baasaboorkaada iyo dukumentiga caddeyneeyso inaa haysatid sharciga dagnaashada wadanka ama inaa xaq uleehad inaa wadanka joogikartid. Waxaa xitaa horey u soo qaadataa *waraaqada caddeynta nikaaxa* [*äktenskapsbevis]* ama *waraaqada caddeynta dhalashada* [*födelsebevis]* hadii ey carruur kula socdaan, waa hadii aad waraaqadaha noocaas aad haysatid.

Waxyaabo badan aad xaq uleedahay iyo waxyaabo badan uu waajib kugu ah wadankaan Iswiidhan waxey ku xiranjihiin hadii aad diiwangalisantahay iyo meesha aad ka diiwangalisantahay. Tusaale ahaan waa iney magaalada Malmö kuu diiwaangelisantahay inaa ku nooshahay sidaa waxbarashada luqada iswiidhishka ugu dhigaan kartid Malmö.

Adiga waa inaa diiwaangalisataa guriga aad ku nooshahay. Soo ogeysii Hey'aada canshuuraha hadii aad adares cusub u guurtid.

Hey'adda canshuuraha (Skatteverket)

Adareska: Kattsundsgatan 7

Telefoonka: 0771 - 567 567

Saacadaha xafiiska: Isniin, Talaado, Arbacada iyo Jimcaha 10:00- 16:00

Khamiis 10:00 - 18:00

Intaan ka badan ka sii akhriso:

www.skatteverket.se/privat/folkbokforing/flytta/flyttatillsverige

KAARKA AQOONSIGA [LEGITIMATION]

Adiga waxaa ubaahantahay *kaarka aqoonsiga* [*legitimation]* oo iswiidhan sidaa u caddeynkartid qofka aad tahay. Xaalado kala duwaan baa dhicikaro aad ubaahantahay inaa is caddeysid sida camal bangiga ama kulanka dhakhtarka. Kaarka aqoonsiga oo iswiidhan waxa ku qoran lambarkaada aqoonsiga. Aad bey muhim u tahay inaa tusinkartid markii loo baahdo.

Kaarka aqoonsiga waxa ahaan karo kaarka batantaha baabuurta oo iswiidhan ama kaarka aqoonsiga (ID-kort).

Hadii aad rabtid in Hey'adda canshuuraha kuu suubiso kaarka aqoonsiga waxaa qasab ah inaa adiga:

- bixisid lacagta suubinta kaarka intaa aadan imaan Hey'adda canshuuraha
- tagtaa xafiisyada Hey'adda canshuuraha midkood oo suubiyaan kaarka aqoonsiga
- caddeyn kartid qofka aad tahay, oo tusaale ahaan kaarka dagnaanshada wadanka
- ka diiwaangalisan tahay Iswiidhan

Hey'adda canshuuraha (Skatteverket)

Adareska: Kattsundsgatan 7

Telefoonka: 0771 - 567 567

Saacadaha xafiiska: Isniin, Talaado, Arbacada iyo Jimcaha 10:00- 16:00

Khamiis 10:00 - 18:00

Intaan ka badan ka sii akhriso: www.skatteverket.se/privat/idkort

XAFIISKA CEYMISKA BULSHADA [FÖRSÄKRINGSKASSAN]

Haddii aad xaq u leedahay caawimaad ka timaada wakaaladda caymiska, halkaas tag oo isdiiwaan geli. Ugu horeyn waa inaad haysataa lambarka aqoonsiga shaqsiga. Soo qaado nuqul ka mid ah go'aanka oo qoraal ah oo ku saabsan ogolaanshiyaha joogitaanka marka aad iska diiwaan gelinayso.

Lacagaha kaalmada ey bixiso xafiiska ceymiska bulshada:

Kaalmada kirada guriga [Bostadsbidrag]
Kaalmada kirada guriga waa caawinaad loogu talagalay adiga oo iska bixinkarin kirada. Hadii aad xitaa tahay guri la'aan waa codsankarta kaalmada kirada guriga hadii aad la nooshahay carruurtaada. Waa muhim inaa ogeysiisid xafiiska ceymiska bulshada hadii aad guurtid, hadii qoyska aad badatiin, dhaqliga idin soogalaayo uu bato ama kirada wax iska badalan. Hadii kaalmada kirada guriga lagu siiyo in ka badan inta aad xaqa u leedahay, waa in aad lacagtaas dib u soo celisaa.

Lacagta kaalmada carruurta [Barnbidrag]
Hadii aad ka diiwaangalisan tahay xafiiska ceymiska bulshada waxaa laguu soo diri lacagta kaalmada carruurta oo carruurta ka yar 16 sano oo sharciga dagnaanshada wadanka haysto. Lacagta kaalmada carruurta si toos baa laguugu soo diri markaa carruurta ka diiwaangalisid xafiiska ceymiska bulshada.

Lacagta kaalmada la siiyo carruurta hal waalid la nool[Underhållsstöd]
Hadii aad adiga iyo waalidka kale aad kala tagteen oo adiga carruurta la nooshahay waa inuu masruufka nolosha carruurta waalidka kale ku siiyo. Hadii oo waalidka kale uusan bixin karin masruufka nolosha carruurta, waxaa ku caawinkaro xafiiska ceymiska bulshada. Hadii waalidka kale oo dhintahay, waxaa ku caawinkaro Hey'adda lacagta hawlgabka.

Lacagta guunada waalidka [Föräldrapenning]
Qoysaska haysta carruurta yaryar waxay heli karaan lacagta gunnada waalidka. Haddii aad guriga joogto oo aad ilmahaaga haynayso, waxa aad heli kartaa lacagta gunnada waalidka.

Xafiiska ceymiska bulshada (FÖRSÄKRINGSKASSAN)

Adareska:	Kattsundsgatan 7
Telefoonka:	0771 - 567 567
Saacadaha xafiiska:	Isniin, Talaado, Arbacada iyo Jimcaha 10:00- 16:00
	Khamiis 10:00 - 18:00
Intaan ka badan ka sii akhriso:	www.forsakringskassan.se

WAXBARASHADA LUQADA ISWIIDHISHKA [SFI - SVENSKA FÖR INVANDRARE]

SFI ama waxbarashada luqada iswiidhishka waa waxbarasho aasaasi oo luqada iswiidhishka oo loogu talagalay dadka waaweeyn oo ajnabiga. Hadafka baa ah inaa adiga aqoon ka yeelatid luqada iswiidhishka sidaa iskugu filnaantid markey noqoto shaqo iyo nolol maalmeedka.

Adiga xaq baa lu leedahay inaa dhigatid waxbarashada SFI hadii aad ka *diiwaangalisantahay* magaalada Malmö oo aadan aqoon ku hadalka iyo akhriska ama qorida luqada iswiidhishka. Hadii aad taqaanid luqada noorweyga ama daynishka ma dhigankartid waxbarashada SFI.

La soo xiriir xafiiska adeega ajnabiga hadii aad rabtid inaa dhigatid waxbarashada SFI.

Warbixin kale oo kusabsan SFI ka akhriso: www.malmo.se/sfi

HANUUNINTA MUSHTAMACA [SAMHÄLLSORIENTERING]

Maadaama aad wadanka ku cusub tahay waxaa dhicikarto in laguu dhigo koorso oo ku sabsan hanuuninta mushtamaca. Koorsada warbixinta aad ka heleysid waxaa kamid ah macluumad ku sabsan Iswiidhan oo loogu talagalay adiga oo wadanka ku cusub. Waxyaabaha aad baraneeysid waxey ku sabsanyihiin shaqo, guriga, sharciyada, caafimaadka isbitaalada iyo nadaamka ey Iswiidhan ku kala socoto.
La soo xafiiska adeega ajnabiga hadii aad rabtid inaa ka qeyb-qaadatid koorsada hanuuninta mushtamaca.

Ka sii akhriso inkale inta: www.malmo.se/Ny-i-Sverige

XAFIISKA XIRIIRINTA SHAQOOYINKA [ARBETSFÖRMEDLINGEN]

Xafiiska xiriirinta shaqooyinka waxaa ka heleysaa warbixin kusabsan shaqooyinka oo shaqaalo loo raadinaayo. Hadii aad tahay shaqo la'aan waxaa helikarta kaalmeen iyo adeeg, caawinad sida camal tilmaam shaqooyinka jiro, taalooyin kusabsan sida aad adiga u raadinkartid shaqo iyo goob xirfadeed.

Warbixin kale waxa ka fiirsata: www.arbetsformedlingen.se ama
soo wac 0771- 416 416

Dadka qoxootiga ah waxa la xiriirtiin **Xafiiska xiriirinta shaqooyinka qeybta Isdhexgelinta** oo ku yaal Amiralsgatan 13.

Hadii aad tahay qof ajnabi oo wadanka ku cusub waxaa la xiriirtaa xafiiska kugu habbon adiga iyo shaqooyinka aad adiga ka soo shaqeeysay. Hadii aadan waligaa aad horey u soo shaqeeyn waxaa dalbataa xafiiska aad adiga isleedahay inuu kugu habbon yahay.

Xafiiska xiriirinta shaqooyinka qeybta Adeega, Kungsgatan 6
Shaqooyinka: ganacsiga/iibinta, huteelada/makhaayadaha,adeega macmiisha.

Xafiiska xiriirinta shaqooyinka qeybta Farsamada, Storgatan 5
Shaqooyinka: dhisinta, soo saarida tamarta, shaqooyinka wax daabaca, qalabka warbixinta loo adeegsado, daryeelka guryaha, daryeelka xayawaanka/beeraha/jardiinada/raashinka/shirkadaha raashinka, dhul nadaafiinta, nadaafiinta/sifeeynta, farsamada ilkaha, wax rarida/bakaarada, garaashada/farsamada.

Xafiiska xiriirinta shaqooyinka qeybta Daryeelka iyo Maamulka, Södra Förstadsgatan 35
Shaqooyinka: shaqaalaha ka shaqeyo ceymisyada iyo bangiyada, qareen, xafiis iyo maamul, macallin, maammulka guud ee dowlada, daryeelka iyo xannaanada.

Xafiiska xiriirinta shaqooyinka (Arbetsförmedlingen)

Bogga internetka: www.arbetsformedlingen.se

Telefoonka: 0771 - 416 416

DEEYNTA ALAABTA MAACUUNTA GURIGA [HEMUTRUSTNINGSLÅN]

Deeynta alaabta maacuunta guriga waa deeyn lacag oo adiga lagu siinkaro sidaa gurigaada ugu soo iibsatid alaabta guriga iyo waxyaabaha kale uu guriga ubaahanyahay. Waxa loogu talagalay adiga oo ah qoyooti ama u imaaday qof wadanka qoxootinimo ku imaaday. Lacagta deeynta waxaa ku shaqo leh Hey'adda la dhaho CSN, laakin la soo xiriir xafiiska adeega ajnabiga, anaga baa kaa caawineyno sidaa deeyntaas u codsankartid.

- Deeynta inta ey noqoneeyso waxey ku xirantahay inta qof aad tihiin qoyskiina iyo hadii guri kuu kireysan yahay ama qof kale gurigiisa ku nooshahay

- Qoyska waxaa lagu xisaabin niinkaada, xaaskaada, labo qof isla nool oo ah qoxooti xaq bey u leeyihiin deeynta, iyo carruurta guriga kugu la nool oo laakin da'dooda gaarin 21 sano.

- Labada qof is qabo/isla nool deeynta mas'uul bey ka wada yihiin dib u soo bixinta deeynta. Hadii aad is furtiin xitaa.

- Sidaa u codsankartid deeynta alaabta maacuunta guriga waa inaa adiga waqti ka ballansataa qeybta soo dhaweeynta ee xafiiska adeega ajnabiga, telefoonka 34 19 94.

Warbixin kale ka akhriso: www.csn.se/hemutrustningslan

CODSASHADA DUGSIGA XANNAANADA IYO BARBAARINTA [ANMÄLAN TILL FÖRSKOLA]

Carruurta waxey dhigan karan dugsiga xannaanada iyo barbaarinta markey noqdaan hal sano ilaa ey ka bilaabaan dugsiga. U dalab canugaaga ugu dambeyn markey afar bilood ka dhimantahay waqtiga aad rabtid in boos la siiyo.

Sidaan baa suubin markaa boos ka codsaneysid dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta ey degmada mas'uul ka tahay:

Soo buuxi foomka codsiga aad ka heleysid xafiiska dadweeynka [medborgarkontor] www.malmo.se

Adiga waxaa xita ka soo codsankarta www.malmo.se/forskola

Adiga waraaqad baa laguu soo diri markuu boos firaaqo noqdo. Sidaa booska u heshid waa inaa ha waa raba booska jawaab ah dib u soo dirtaa waraaqada waqtiga laguu qabtay gudaheeda. Hadii aadan sidaas suubin canugaaga booska waa laga kaansali oo codsiga waa la tertiri. Markii booska lagu siiyo waa inaa soo buuxisa foomka ogeysiinta dhaqligaada oo u soo dirta qeybta bixinta lacagaha [Debiteringsenheten]. Hadii aadan foomkaas soo buuxin weeysid kharashka kirada booska kan ugu qaalisan baa bixin.

Hadii aad rabtid xitaa waxaa boos ka codsankarta dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta oo shaqsiyada gaarka iska leeyihiin. Codsiyada waxaa toos ugu dirsan dugsikasto. Warbixin kuwa ey jihiin waxaa ka heleysaa www.malmo.se/forskola

Dugsiyada xannaanada iyo barbaarinta oo degmada mas'uulka ka tahay waxey furanjihiin maalmaha caadiga , isniin - jimco
06.15 - 17.30. Hadii aad ubaahantahay sacaadaha uu furanyahay waxaa laga dhigikara ilaa 18.30.

Dhammaan carruurta xaq bey u leeyihiin in ey dhigtaan dugsiga xannaanada iyo barbaarinta, 15 saac isbuuci, dayrta sannadka ey buuxinaayaan saddax sano.

ISKA DIIWAANGALINTA DUGSIGA
[INSKRIVNING I GRUNDSKOLAN]

Carruurta wadanka ku cusub oo jiran 6 ilaa 16 sano waa in ey Mosaikskolan si ey iskaga diiwaangaliyaan dugsiga. Labada waalid midkood ama waalidka mas'uuliga ah waa inuu canuga soo raaco. Dugsiga aasaasiga waa qasab in la dhigto laga bilaabo da'da 7 ilaa 16 sano.

Carruurta iyo waalidka ama *waalidka mas'uulka* ah waa in ey kaarka aqoonsiga sitaan. Waa isku caddeynkartaa kaarka qoxootiga oo sharciga dagnaanshada ey bixiso Hey'adda Socdaalka.

Hadii aad shaqeysid ama waxbarasho dhigatid waxaa xaq u leedahay in canugaaga kuu dhigto dugsiga xiliga firaaqaha. Arrintaan waxey suurtagal tahay maalinta oo canugaaga bilaabo fasalka ardeyda lix sano jirka ah ilaa 13 sano ey ka noqdaan. Dugsiga xiliga firaaqaha wuxu furanyahay subaxdii aroorti inta xisadaha dugsiga eysan bilaaban iyo galbihii markuu xisadaha dugsiga ey dhammaadan. Waxaa weeydiisa dugsiga uu canugaaga dhigto sidaa boos loogu codsado dugsiga xiliga firaaqaha.

Mosaikskolan

Adareska:	Rönnblomsgatan 6 A
Telefoonka:	0729 - 814121
Saacadaha telefoonka:	Isniin - Jimco 08:00-09:00
Saacadaha oo furan yahay is diiwaangalinta dugsiga:	Talaado, arbacada, khamiis 09:00 - 13:00

ISKA DIIWAANGALINTA BARASHADA LUQADA [INSKRIVNING I SPRÅKINTRODUKTION]

Hadii aad wadanka ku cusub tahay oo jirtid inta u dhaxeyso 16 sano ilaa 20 sano waxa ka qeyb-qaadankarta bilaawga luqad barashada. Meeshaas baa ka baraneeysaa luqada iswiidhishka, sidaa maarkaas kadib ugu sii gudbi kartid dugsiga sare ama waxbarasho kale.

Sidaa isku diiwaangalin kartid la soo xiriir:

Peggy Thornström
Värnhemsskolan
Kungsgatan 44
Telefoonka 076-6076912
Saacadaha telefoonka: Isniin - Jimco 10:00-11:00
peggy.thornstrom@malmo.se

HEY'ADDA SOCDAALKA [MIGRATIONSVERKET]

Hey'adda socdaalka baa ah hey'adda baarto iyo go'aan ka gaarto codsiyada ka imaado dadka rabaan iney Iswiidhan u soo guuran, booqasho u imaadan, codsadaan muwaadinimo iswiidhisheed ama magangelyo.

Hey'adda socdaalka waxey kaa caawinkaran:

- in waqti laguugu daro sharciga dagnaanshada
- inaa diiwaangalisid xaqa joogista wadanka
- muwaadinimo iswiidhisheed
- dukumentiga lagu safro
- baasaaboorka dadka shisheeyaha
- in waqti laguugu daro sharciga booqashada

Hey'adda socdaalka (Migrationsverket)

Adareska:	Agnesfridsvägen 111
Telefoonka:	0771-235 235
Saacadaha telefoonka:	Isniin - Jimco 08:00-16:00
Saacadaha xafiiska:	Isniin - Jimco 09:00-15:00
Ka sii akhriso:	www.migrationsverket.se

DARYEELKA ISBITAALKA [SJUKVÅRD]

Dhammaan bulshada oo ku nool iyo ka diiwaangalisan wadanka Iswiidhan waxey xaq u leeyihiin daryeelka isbitaalada ey bixiyaan. Hadii aad ubaahantahay daryeel isbitaal waxaa gacanta koowad la xiriiri rugta caafimaadka. Adiga baa dalbankartid rugta caafimaadka aad rabtid inaa ka tirsanaatid.

Hadii aad xanuunsan tahay oo aad rabtid inaa su'aal na weeydiisid, waxaa soo wici karta telefoonka warbixinta caafimaadka. Waxaa markaas la hadli karta kaalkaaliso, oo taalooyin ku siinkarto iyo kuu gudbinkarto daryeelka kugu habbon.

Hadii cudurkaada uu yahay halis iyo degdeg ama shil daco waxa tagi kartaa rugtaa degdega. Inta aadan soo bixin soo wac 1177, sidii laguugu sheego hadii aad ubaahan tahay inaa soo aadid rugta degdega. Hadii ey arrinta degdeg ey tahay oo adiga ubaahan tahay ambalaas waxaa soo wacdaa 112.

Bogga www.1177.se waxaa ka heleysaa warbixin ku sabsan daryeelka isbitaalka oo gobalka Skåne. Meeshaas baa ka arkikarta rugta caafimaadka oo kala duwaan oo kala dalbankartid, warbixin ku sabsan cudurada kale duwan iyo daryeelka aad xaqa u leedahay iyo inkale.

Hadii aad turjum ubaahan tahay daryeelka isbitaalka baa ku ballaminaayaan turjum. Adiga xaq baa u leedahay turjum iyo waa bilaasha.

Dhammaan carruurta jiro ilaa lix sano weey u fiicantahay iney xiriir la lee yihiin rugta caafimaadka carruurta. Meeshaas bey carruurta ka heleyaan baaritaanka caafimaadka oo carruurta iyo tallaalinta. Waxaa xitaa heleysaa talooyin oo ku sabsan horumarka canugaaga.

Dumarka uurka leh waxey baari karan caafimaadkooda iyo caafimaadka canuga uurka ey meesha qeybta kaalkaalisooyinka ummusha. Meeshaas baa ka heli talooyin iyo caawinaad ku sabsan arrimaha caafimaadka galmada. Qeybta kaalkaalisooyinka ummusha waxaa ka wada dhaxeeyo hal telefoon lambar oo la dhaho "Toos ula xiriir ummuliso". Meesha aad kala xiriiri kartid hoostaan baa ka heleysa.

Marka dhakhtar la kulmeysid badana waa inaa bixisa qarashka isbitaalka. Lacagaha aad bixisid waxa ku calamadeysataa *kaarka bixinta qarashka isbitaalka*. Adiga inta ugu badan aad bixineysid waa 1100 karoon hal sannad gudahiisa. Hadii aadan imaan ballanta waa inaa bixisa qarasha labolaab. Qarashkaas laguugu ma qoraayo kaarka bixinta qarashka isbitaalka. Hadii aad ka warhaysid inaa imaankarin waqti ballan, waa qasab inaa baajisid ugu dambeyn 24 saacadood ka hore.

Daryeelka isbitaalka (Sjukvård)

Warbixinta caafimaadka	Lambarka telefoonka: 1177
Rugtaa degdega	Adareska: Ruth Lindskogs gata 5
Xaalad degdeg	Lambarka telefoonka: 112
Toos ula xiriir ummuliso	Lambarka telefoonka: 040-33 33 00
Ka sii akhriso:	www.1177.se

DARYEELKA ILKAHA [TANDVÅRD]

Adiga baa dalbankartid hadii aad rabtid inaa tagtid daryeelka ilkaha oo shaqsiga ama *daryeelka ilkaha oo bulshada*. Dadka waaweeyn waa in inta ugu badan oo qarashka ilkaha iska bixiyaan. Laakin qarashka qeyb ka mid ah waxa ka caawinkaro *Xafiiska ceymiska bulshada*, waa hadii aad ka diiwaangalisan tahay halkaas.

Carruurta iyo dhallinyarada oo ka yar 20 sano daryeelka ilkaha wuxu u yahay bilaash. Ayaga waxaa lagu martiqaada baaritaank oo bilaa lacag la'aan ah wixi laga soo bilaabo da'da saddax sano jirka. Hadii canugaaga xanuun degdeg haayo adiga baa ballan ka suubsan kartid dhakhtarka ilkaha.

Hadii aad adiga ubahaantahay degdeg daryeel ilko waxa gacanta koowad la xiriiri dhakhtarka ilkaha aad caadiyan u tagtid. Hadii aad caawinada u baahantahay markey tahay habeen ama sabti/axad waxa soo wacdaa 1177, oo markaas baa lagu siin warbixin ku sabsan dhakhtarka ilkaha oo shaqeynaayo.

Warbixin ka sii akhriso: www.1177.se/Skane/Tema/Tander/

GURI [BOSTAD]

Magaalada Malmö waxa laga hela shirkad guryahay kireyso oo la dhaho Boplats Syd. Meeshaas baa saf ku jiri karta sidaa guri u heshid. Ayagada guryahay waxey u kireyan sida la iskugu xigo. Hadii aad safka waqti badan ku jirtid waxaa badaneyso fursada aad guri ku heli leheed.

Adiga waxa iska diiwaangalin karta bogga internetka shirkada Boplats syds ama xafiiskooda. Lacagta ey qaadanaayaan waa 300 karoon sannadkasto oo safka ku jirtid.

Adiga guri waxa xitaa guri ka raadin karta oo waxa toos ula xiriiri karta shirkadooyinka shaqsiga oo guryahay kireyo. Shirkadooyinkaasna waxey leeyihiin xeerar ayaga qaas u ah iyo nadaam safeed oo qaas u ah.

Boplats syd

Adareska:	Lejonetpassagen, Stortorget 8
Saacadah xafiiska:	Isniin - Khamiis 09:00-12:00 iyo13:00-15:00 Jimco 09:00-12:00
Lambarka telefoonka:	040-34 24 50
Ka sii akhriso:	www.boplatssyd.se

MACLUUMAAD KALE [MER INFORMATION]

www.informationsverige.se

Warbixin ku sabsan mushtamaca oo loogu talagalay ajnabiga iyo qoxootiga wadanka ku cusub. Macluumaadkaas waxa lagu soo turjumay luqadaha: carabiga, dari, ingiriiska,beershiga, soomaaliga iyo tigriini. Waxa xitaa internetka ka soo qaadan karta buuga la dhaho Om Sverige, oo dhowr luqad lagu turjumay.

www.informationsverige.se/Svenska/Samhalle/Sidor/Boken-Om-Sverige-på-flera-språk.aspx

www.sweden.se

Warbixin iyo qoraalo ku sabsan Iswiidhan oo luqadaha: ingiriiska, faransiiska, jarmalka, isbaanishka, ruushka, shiineysiga iyo carabiga

www.dinsakerhet.se

Warbixin ku sabsan sidaa shilalka uga hor tagikartid iyo waxyaabaha aad suubinkartid hadii arrin halis ey dhacday. Warbixintaas waxa lagu turjumay 66 luqadood!

www.8sidor.se

Warar lagu qoray iswiidhish sahlan

http://sverigesradio.se/International

Warar oo dhowr luqad oo kala duwan.

www.malmo.se

Warbixin ku sabsan magaalada Malmö

QAAMUUS (ORDLISTA)

Diiwaangelinta bulshada [Folkbokföring]
Diiwaangelinta bulshada waxeey micnaheeda tahay in la diwaangaliyo meesha aad adiga ku nooshahay. Waxyaabaha oo xaqaada ah iyo waxyaabaha oo waajibka kugu ah waxey ku xirantahay **hadii** aad diwaangalisan tahay, iyo **meesha** kuu diwaangalisan in aad ka tirsantahay.

Daryeelka ilkaha oo bulshada [Folktandvården]
Daryeelka ilkaha oo bulshada waa magaca caafimaadka iyo daryeelka ilkahaga oo ah daryeelka caafimaadka ey dowlada bixiso. Daryeelka ilkaha waxa garab yaal daryeelka ilkaha oo shirkadaha shaqsiga ey bixiyaan.

Waraaqada caddeynta dhalashada [Födelsebevis]
Waraaqada caddeynta dhalashada waxey sheegi meesha iyo waqtiga aad adiga dhalatay iyo dadka ah waalidkaada.

Xafiiska ceymiska bulshada [Försäkringskassan]
Xafiiska ceymiska bulshada waa hey'adda mas'uulka ka ah nidaamka nabadgelyada. Ayaga baa bixiyo lacagaha kaalmada oo wadanka Iswiidhan ka jiro, oo tusaale ahaan lacagaha la siiyo qoysaska carruurta haysto iyo dadka xanuunsan.

Kaarka bixinta qarashka isbitaalka [Högkostnadskort]
Kaarka bixinta qarashka isbitaalka waxaa loogu talagalay in aad adiga marna bixin 1100 karoon dhakhtar aad la kulan dartiis hal sano gudaheeda. Markasto aad adiga dhakhtar la kulantid oo lacagta kulankaas bixisid waxaa la guugu shaambadeen kaarka bixinta qarashka isbitaalka. Markey lacagta aad bixisay ey gaarto 1100 karoon caafimaadka waxaa ku heleysa bilaa lacag la'aan muddo.

Hey'adda lacagta hawlgabka [Pensionsmyndigheten]
Hey'adda lacagta hawlgabka baa xafiiska dowlada sare oo mas'uulka ka lacagta bulshada hawlgabka, oo loola jeedo lacagta la siiyo dadka oo gaareen da'da shaqooyinka looga fadhiisto.

Hey'adda canshuuraha [Skatteverket]
Hey'adda canshuuraha baa mas'uul ka ah lacagta canshuurta ey bixiyaan dhammaan bulshada wadanka ku nool. Waxyaabha kale oo ey qabtaan baa waxaa ka mid ah diiwaangalinta bulshada iyo kaarka aqoonsiga oo wadanka Iswiidhan.

Waraaqada caddeynta nikaaxa [Äktenskapsbevis]
Waraaqada caddeyneyo inaa tahay qof oo xaas le/xaas leh.

Waalidka mas'uulka ah [Vårdnadshavare]
Waalidka mas'uulka ah waxaa ah qofka ama dadka sharciyan mas'uul ka ah canuga. Badanaa waa waalidka dhalay canuga waxa ah waalidka mas'uulka ah, laakin waxa xitaa ahaan kara qof aan dhallin canuga hadii ey waalidka daryeelka iyo mas'uuliyada canuga ey ka soo bixi karin.